

Tilmaamaha Macaamiisha ee La Shaqeynta Turjubaanka

Tilmaamaha loogu talagalay Macaamiisha

Waxaan kaala hadli doonaa sida aan ula shaqeyn doonno turjubaanka. Doorke turjubaanku waa inuu hubiyo inaan si buuxda isu fahanno wax kasta oo aan isu sheegno. Wax kasta oo aan ka wada hadalno waa sir, taas oo macnaheedu yahay in aniga iyo turjubaanku aanan cid kale u sheegi karin waxa aan maanta ka wada hadalno adiga oo aan oggolaansho na siin. Si loo hubiyo in wax kasta la turjumo, adiga iyo anigu waxaan u baahan doonaa inaan hakanno jumlad kasta kadib si aan turjubaanka fursad ugu siinno inuu turjumo. Haddii aan u baahdo inaad hakato inta aad hadlayso si turjubaanku u turjumo, waxaan gacanta u taagi doonaa sidan. Maanta waxaan ka hadli doonaa... (ku dar ujeeddada kulanka, tusaale ahaan, "...codsiga amar ilaalin ah, sidaas darteed aad bay muhiim u tahay inaan u maqlo wax kasta sida loo sheegay, oo ay ku jiraan macluumaad muuqaal ahaan adag ama rabshado la xiriiira."). Ma qabtaa wax su'aalo ah oo aad iga weydiinayso la shaqeynta turjubaanka ama kulankeena maanta?

Su'aalaha Dabagalka ah Kadib Wareysiga si Loo Xaqiijiyo Fahamka Macmiilka

Su'aalaha Tusaalaha ah:

1. Waxaan ka wada hadalnay amar ilaalin ah. Ma ii sharxi kartaa waxa aad ka fahantay waxa uu yahay amar ilaalin ah?
2. Waxaan kaala hadlay qaar ka mid ah xulashooyinka aad haysato. Kahor intaadan bixin, ma ii sheegi kartaa xulashooyinka aad haysato ee aad u baahan tahay inaad go'aan ka gaarto?
3. Kulankeena xiga, waxaan kaa codsaday inaad keento qaar ka mid ah dukumeentiyada. Ma ii sheegi kartaa dukumeentiyada lagaa rabo inaad keento?

Tilmaamaha:

Qor lambarka aqoonsiga turjubaanka si loogu diiwaangeliyo ama loogu soo sheego haddii uu dhaco khalad. Ama qor magaciisa si aad ula socoto haddii turjumaaddu ay tahay mid fool ka fool ah.

Hadalka tooska ahi waa muhiim si loo ilaaliyo saxnaanta loona yareeyo suurtagalnimada in turjubaanku soo koobo, wax ku daro ama wax ka badelo.

Tilmaamaha Macaamiisha ee La Shaqeynta Turjubaanka

Maskaxda ku hay in kulan lagu adeegsanayo turjubaanka uu qaadan karo waqti laba jibbaar ka badan kulanka aan turjubaanka lahayn (samir yeelo).

Soo koobista uu sameeyo turjubaanku waxay muujinaysaa in turjubaanku aanu turjumayn wax kasta oo la sheegay. Haddii macmiilkaagu uu hadlayo muddo hal daqiiqo ah, turjubaankuna uu hadlo oo keliya 10–15 ilbiriqsi, markaas adiga ama macmiilkaagu waxaad seegaysaan qaybo ka mid ah wada hadalka.

Haddii macmiilkaagu ku jawaabo dhowr eray oo keliya, turjubaankuna ku jawaabo dhowr jumladood, markaas turjubaanku wuxuu ku darayaa macluumaad ama faahfaahin aanu macmiilkaagu sheegin.

Hayso diiwaan ku saabsan cidda ay yihiin turjubaanada aqoonta leh haddii loo baahdo mustaqbalka.

Hubinta Kadib Turjumaadda (Waa in lagu weydiiyaa iyadoo la adeegsanayo turjubaan kale)

Waxaan rabay inaan wax kaa waydiiyo sida ay kuu ahayd la shaqeynta turjubaanka. Ma ii sheegi kartaa sida aad ku dareentay la shaqeynta turjubaanka? (Su'aalaha dabagalka ah: Ma ku qanacsanayd la shaqeynta turjubaanka? Ma kula ahayd in turjubaanku shaqadiisa si wanaagsan u qabtay? Turjubaanku ma sheegay wax aad dhibsatay?